


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Wiilkii Wixiisii
Khasaariyey



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Ciise wuxuu jeclaa inuu dadak u shego waxyaalaha ku saabsan cafinta Ilaah. Laakiin hoggaamiyayaasha Yuhuuddu waxay ka cawdeen saaxiibtinimadiisa dembiilayaasha. Sidaa darteed Ciise wuxuu u sheegay saddex sheeko si uu u muujiyo in Ilaah ku faraxsan yahay marka dembiilayaashu ka qoomameeyaan dembiyadooda.



Sheekada ugu horreysa waxay ku saabsan
tahay Nin haystay

boqol neef oo ido
ah. Mid baa ka
lumay/halowday.
Isla kolkiba si toos
ah ayuu aadhijirihii
sagaal iyo sagaashankii
cidlada uga tagay
oo tii luntay ka
daba tagay.





Adhijirihii wuu raadiyey oo raadiyey ilaa uu ka soo helo. Deedna garbihiis ayuu ku soo saartay oo u soo qaaday xaafaddii isaga oo aad u faraxsan.

Saaxiibadii buu ku yidhi, "Ila Farxa, inaan soo helay neefkaygii idaha ahaa ee iga lumay!"



Ciise wuxuu ugu sharxay in ay farxad weyn janada kaga jiri doonto dembiilayaasha toobad keena. Toobad keenidda micnaheeda waxa weeyaan in laga xumaado demiyadeenna - wey ku filan tahay ka xumaasha ka dhan aamusnaan!





Ciise sheekadiisa ku xigta
waxa weeye oo ay ku
saabsan tahay qof dumar
(Naag) ah oo haysaatay
toban lacag sanuud ah,
laga yaabee inay ahayd
inay nolsheedii oo idil ay
urusanaysay intaa yar.

Wax aan fiicnayn baa
qabsaday oo. Waxaa
ka luntay senti ka md
ahaa sunuuddii.



Wey Xaaqday! Oo Xaaqday!
Oo Xaaqday aqalkeedii naagtii
meel walba ayaya ka baartay.



Ugu dambayntii lacagtii ka luntay
wey heshay. Aad by u farxday.
Maad qiyaasi kartaa waxa ay
samaysay? Haa, waxay u sheegtay
dhammaan saaxiibadeedii oo idil!





Mar labaad Ciise
wuxuu yidhi,
"Sidaa oo kale
maerkii mid dembi
leh toobad keeno,
farxad ayaa kaga
jirta Malaa'igaha
hortooda."




Sheekada sadexaad ee uu
Ciise sheegayna waxay tahay
tii ugu murugada badnayd.
Wuxuuna ka hadlay wiil
isaga gurigii Aabbihi.



Dal fog buuna ku kharash gareeyey lacagtiisi oo idil si nacasnima ah. Iminka muxuu samayn karaa? Waxay ku samaysay wax laga naxo, macluul, wiilii gaajuu la dhiman karaa.



Baahi aad u daran, wiilkii shaqo ayuu ka helay xero doofaarada lagu quudiyo. Wuxuuna ku farxsanaa inuu cuno raashinka doofaarada. Laga yaabee inuu sidaa sameeyey! Ugu dambayntii, wiilkii caqligiisii baa soo noqday. "Ku noqo gurigiinii, xitaa shaqaalaha cunta wanaagsan bay cunaan," ayuu ku fikiray ama is yidhi.






"Gurigii baan aadayaa oo sheegayaa Aabbahay inaan ka xumahay dembiyadeedii. Ma istaahili inaan wiilkaaga noqdo hadda ka dib. Waxaan rajaynayaa inuu i shaqaalaysiin doono shaqaaale ahaan."



Intii uu weli meel fog oo ka duruksan gurigii
Aabbihiisoo socday, Aabbihiis baa arkay inuu soo
socdo, Aabbihiis baa ku soo orday wiilkiisii soo
noqonaya. Wuu dhunkaday
oo laabta saaray isagii.





“Aabbe waan kuugu gafay.
Ma istaahilo inaan
wiilkaagii noqdo.”
Wiilkii AAbihii wuxuu
weyddistay inuu u
kireysto shaqaale ahaan.
Aabihii baa ka dhex galay.
U keena khamiiska ugu
fiican, kabo iyo kaatun
wiilkayga. Oo u diyari
xaflad weyn.”



Waxaa dhacday xaflad lala yaabay sababtoo ah wiilkii lumay baa la helay. Ciise ayaa sheekadan sheegay sababta oo ah waxay tusuneysay sida Ilaah u jecel yahay inuu aqbalo dembiilayaasha u toobad keeno Isaga.



Wiilkii Wixiisii Khasariyey

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Luukos 15

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

